

BAARITAANKA BROOK HOUSE

Waa maxay ujeedada baaritaanka Brook House?

Waxaan baaris ku sameynaynaa dhaqan xumida maxaabiista Brook House IRC lagu hayay intii u dhexeysay 1da Abriil 2017 iyo 31 Agoosto 2017. 'Dhibaataaynta' micnaheedu waa hab dhaqan ka soo horjeedda Qodobka 3aad ee Baaqa Yurub ee Xuquuqda Aadanaha.

Ujeeddada Baadhitaanku waa in la ogaado xaddiga khaldan ee Brook House IRC inta lagu jiro mudada lagu qeexay [Shuruudaha tixraaca](#). Baadhitaanku wuxuu baari doonaa mas'uuliyadda qalalaasahaas iyo haddii dhicitaannada hab-dhismeedka ay gacan ka geysteen. Iyada oo la adeegsanayo aruurinta cadaymaha iyo dhagaysiga dadweynaha, Baadhitaanku wuxuu baari doonaa la xisaabtanka dhacdooyinka ka dhaca Brook House IRC iyo, iyada oo loo sii marayo daabacaadda warbixinta, wuxuu sameyn doonaa talooyin si dhammaan ururada ay quseeysa ay uga baran karaan casharrada wixii dhacay.

Ka madax banaan dowladda

Ka madax banaan Dowladda

Baadhitaanku waa baaritaan madaxbannaan oo lagu baaro dhacdooyinka ka dhaca Brook House IRC intii u dhexeysay 1da Abriil 2017 iyo 31 Agoosto 2017.

- In aad madax banaanaato micnaheedu waa baaritaanku ma ahan qeyb kamid ah dowlada mana ahan mid ay wado waax dowladeed;
- Ahaanshaha sharci ahaan waxaa loola jeedaa in baaritaanku loo beddeley baaritaan hadda jira oo la weeydiyo wax weydiinta sida ku xusan Xeerka Waxweydiinta 2005 wuxuuna leeyahay awoodda lagu qasbo marqaatiyada si ay u bixiyaan caddeyn una soo saaraan dukumiintiyo..

Sidee naloola soo xiriirayaa

Miyaa lagugu qabtay Brook House IRC intii u dhexeysay 1 Abriil 2017 iyo 31 Agoosto 2017? Hadey saas tahay, waxaan rabnaa inaan adiga wax kaa maqalno. Waad nala soo xiriiri kartaa adigoo adeegsanaya [Foomka Xiriirkayaga](#) ama mid ka mid ah hababka hoos ku qoran:

Telefoonka: [0800 181 4363](tel:08001814363)

Emailka: enquiries@brookhouseinquiry.org.uk

U Qor: **Freepost BROOK HOUSE INQUIRY**

Ma inaan Ingiriis kugula xiriiraa?

Haddii aad doorbideyso inaad nagula so xiriirto luqad aan ahayn Ingiriisiga, fadlan noo sheeg annagana waxaan kuu diyaarin karnaa inaan kugula hadalno adeeggayaga tarjumaadda.

Waxaan rabaa inaan ka qeyb galo baaritaanka

Haddii aad hore u leedahay qareen adiga kuu shaqeynaya, fadlan kala hadal iyaga inaad noqoto ka qeybgale muhiim ah. Haddii aadan wali haysanin garyaqaan ama aadan horay ula soo xiriirin fadlan nala soo xiriir adigoo adeegsanaya mid ka mid ah hababka kor ku xusan.

Xageen ka heli karaa macluumaad dheeri ah?

Macluumaad dheeri ah waxaa laga heli karaa bartayada internetka oo ay ku jiraan taariikhaha [dhageysiga](#), macluumaadka ku saabsan [goobteenna](#) iyo [wararka](#) ku saabsan Baaritaanka.

Ururo waxtar leh

Nasiib darro, ma awoodno inaan bixinno caawimaad ama talobixin ku saabsan soogalootiga, oo ka baxsan aagag baarista Baadhitaankan. Haddii aad u baahatid wax taageero ah oo laxiriira xaaladaada socdaalka ama aad walwal ka qabtid daryeelka, fadlan la xiriir mid ka mid ah ururada hoos ku qoran:

[Laanqayrta Cas](#)

Waxay siin kartaa gargaar samafal deg-deg ah qaxootiga iyo magangalyo-doonka, iyo dhibanayaasha ka ganacsiga dadka

[Damiin lagu siidaayo Maxaabiista Socdaalka](#) - Tel 020 7456 9750 (Isniinta - Khamiista 10 subaxnimo - 12 duhurkii)

Waxay siisaa talo sharci iyo wakiilnimo muhaajiriinta ku xayiran xarumaha raritaanka iyo xabsiyada.

[Caawinta muhaajiriinta](#) - Khadka Caawinta Magangalyo doonayaasha ee Bilaashka ah 0808 8010 503

Waxay siisaa talo iyo caawimaad muhaajiriinta.

[Caddaaladda Caafimaadka](#) - Tele 0207 561 7498

Waxay siisaa talo caafimaad oo madaxbanaan iyo qiimeyn maxaabiista waxayna warbixinno ka qortaa waxyaabaha sharci darrada ah iyo waraaqo muujinaya walaacyo caafimaad oo weyn.

[Kooxda daryeelka Maxaabiista ee Gatwick](#) - Tel 01293 657070

Waxay siisaa taageero iyo saaxiibtinnimo maxaabiista lagu hayo Gatwick IRC iyo qoysaskooda.

[Dhex-dhexaadiyaha Xabsiyada iyo Carbinta](#) - Tel lo-wac 0845 010 7938 (adeegga telefoonka jawaabta)

Baadhitaan madax-bannaan oo ah cabashooyinka ka socda kuwa xabsiga ku jira ama lagu haayo xabsi socdaal.

[Samaariyasha](#) – ama tel 116 123 lacag la'aan

Taageero dhagaysi bilaash ah oo loogu talagalay kuwa baahan

Si aad u soo dejiso PDF macluumaadkan guji